Sh. Ali AL-Tantaawi

Inankeygiyoo

Turjume:

Ustaad. Abdiaziz Ali sheikh (Belhadj)



Inankeygiyoo

يَا ابني

Sh. Ali al-Tantawi

الشيخ علي الطنطاوي

Turjume:

Ustaad. Abdiaziz Ali sheikh (belhadj)

Inankeygiyoo

Copyright © 2024 by al-ustaad. Abdiaziz Ali sheikh (Belhadj)

Xuquuqda buuggaan waxaa iskaleh turjumaaga buugga

Lama daabici karo, copy lagama sameyn karo,

Qoraalkiisa na wax lagama badali karo,

Iyadoon fasax laga haysan turjumaaga buugga.

Gmail: ibnuali042@gmail.com

WhatsApp: +252619938945

Tusmada buugga

Contents

Mahadnaq i

Ujeedada aan u turjumay ii

Hordhac iii

CUDURKA DHALANYARADA 1

Sadax midkooda dooro! 5

Rususha shaydaanka 9

Bani aadanku Naftiisa Cid Kale 14

Kama Hormariyo! 14

Astaanta awoodda 19

Mahadnaq

Allah ayay mahad u sugnaatay

Oo ii suurta galiyay inaan turjumo buug kale uu qoray

Sheikh. Ali al-tantaawi,

Oo Allah ka yeelay buugga Inankeygiyoo

Marka xigga, waxaa mahadnaq iga mudan hooyadey macaan, oo aan Eebbe ugu barinaayo inuu siyo cafimaad iyo cimri suuban.

Waxaa kaloo xusaid iga mudan Aabahey Cali Sheikh C/qaadir, Allah ha u naxriisto, qabrigiisna Allah u waasiciyo.

Waxaan ka codsanaayaa qof walbo oo aqriyo buugga inoo igu duceeyo.

Sido kale waxaan mahanaq balaaran u diraayaa saaxiibadeyda qaaliga ah iyo inta aqrisay buugga (inanteydiyeey) oo igu dhiiriyeen inaan

Si wado turjumidda bugaagta dhiiri galinta.

Ujeedada aan u turjumay

Ka dib iyo markii aan turjumay buugga Inanteydiyey, waxaan filanaayay inuusan ka dhexbaxeynin xindaabka gabdhaha, sababto ah, gabdhaha ayuu si gaar ugu socday, sida uu buugga magaciisa u muuqdo, hasa yeeshe waxaa lama-filaan igu noqotay in dhalanyaro badan igala soo xariiray whatsappka, oo iga codsadeen buugga inanteydiyeey, misana qaarkooda I weydiyay inuu jiro buug aan ugu gaar yeelay wiilasha.

Ujeedo la`aan bani aadanku hawl ma qabto, ujeedadu waxay noqon karta mid aad maal ku raadineysid, ama mid aad bulshada wax ugu taraysid, anigana mida labaad ayaan door biday, markaan arkay baahida ay dhalanyaradu u qabaan bugaag noocaan oo kale, taasi ayaa igu dhiirisay inaan waqti iyo juhdi ku bixiyo, sido kale waxyaabaha igu dhiiriyay waxaa ka mid ah, codsiga igaga imaaday dhalanyarada aqrisay buugii inanteydiyeey, dhiirgalintooda ayaan ka shidaal qaatay, muddada aan ku turjumayna ay tahay muddo labo bilood, bisha: May ila Juun 2024.

Alxamdullilah waana muddo ka yar mudadada aan ku turjumay buugga inanteydiyeey.

Bismillah Allah al-raxman al-raxiim

Hordhac

Buuggaani waa jawaab uu Sheikha ka jawaabaayo fariin qoraaleed oo ugu timid wiil dhalanyaro ah, wiilkaasi oo ka cawanaayay dareen xad dhaaf ah, uusan garaneynin sida uu ku xalin lahaa, sida awgeeda Sheikha fariintaasi ayuu ka jawaab celinaaya isagoo adeegsanaaya qaacidada ah, xalka intaadan u cararin, dhibaatada iyo sababaheeda garo.

Buuggaani oo la magac baxay (Inankeygiyoo), oo aan u badalay afkeena hooyo, waxaa ka horeeyay buug kale oo la yiraahdo (Inanteydiyeey)

Buugga inankeygiyoo waa buug uu qoraaga ku falanqeynaayo dhibaato bulshada heysato, waliba dhibaatadaasi si gaar ay ugu cawdaan wiilasha, uu buuggaani qoraagga ku sheegaayo xalka iyo talaabooyinka loo mari lahaa.

Bilaawga buugga Sheikha wuxuu kasbanaayaa aqristaha, wuxuuna siinaaya kalsooni, iyo si aan ganbasho lahaynin ayuu ugu cadeynaayaa xaqiiqda iyo waaqaca jira.

Sido kale, si uusan aqristaha Buugga u dareemin, niyad-jab, uusan u arag buuggaan inuu yahay canaan, taaso sababi karta inuusan buugga dhamaysanba, wuxuu aqristaha dareensiinaaya xaalada uu ku sugan yahay, inaysan ugaar ehaynin, oo dhalanyaradu ay la wadaagaan, ka dib, wuxuu tusaayaa dhibaatoyinka ay leedahay arinta uu ka cawanaayo iyo waxa kaga imaan kara qofkii joogteeya, sido kale wuxuu siinaaya talooyin, iyo tusaalooyin, ugu danbeynti xalkeeda ayuu kusoo gababaynaayaa.

CUDURKA DHALANYARADA

Ku socoto: mudane "M - C " oo ka soo jeeda al-ismaaciiliya

(dalka masar), kaasoo ii soo diray fariin qoraaleed, oo iga codsaday inaan qoraalkiisa aqriyo oo aan u jawaabo.] [1]

Inankeygiyoo, Sabab aad igu soo qortay adigoo ka laba-labeynaayo, misana iga xishoonaayo?

Miyaad mooday inaad kali ku tahay, xaaladda iyo kuleelka aad ka dareymesid shahwada, oo miyaad mooday in adiga kaligaa laguu gaar yeelay, oo aysan dadka kale, kula qabin?

Maya, Inankeygiyoo, niyadaada kheyr u sheeg, waxa aad ka cabaneysid ma ahan cudur adiga kuu gaar ah, hasa yeeshee waa cudur dhalanyarada ay ka wada siman yihiin.

Waxaana xaqiiqo ah inaan xilli horay iyo waqti xaadirkaan, aan arinkaan ka soo hadlay, sido kale anigu ma jecli hadalka soo noq noqda, mana jecli inaan ku cel-celiyo qoraal aan horay u qoray, hadday dhacdana, inyar ayaan dhanbaaladeyda oo aan horay qoray ka soo xigtaa

hadal aan horay u iri, intaan dib ugu laaban lahaa, waxaa igaga fudud inaan kuu soo gudbiyo dhanbaalada aan ka qoray mawduucaan, misana inaan kuu tilmaamo goobta laga helo!

---

(1) Waxaa dhanbaalkaan (Inankeygiyoo) La Daabacay 1955.

INANKEYGIYOO

Xaaladda aad ka cabanaysidna hadii ay ku dhibtay adigoo jira da`da todobo ii taban, waxaad ogaata inay dhibtay dad badan oo qeyrkaaga ah, yar iyo weyn, had iyo jeerna, wuxay indhahooda u diiday macaanka hurdada,

Had iyo jeerna, waxay arday badan ka jeedisay wax barashada, kan shaqaysatana waxay ka jeedisay shaqadiisa, kan ganacsatada ahna waxay ka jeedisay ganacsigiisa.

Jacaylka ay abwaanada ku fitnoobeen tilmaan bixintiisa, iyo qoraayaalka ay ku mashquuleen falanqayntiisu,

Waxay la mid tahay xaaladda aad adigu daremeysid, misana aad ka cabanaysid, sinna uguma duwana, hasa ahaatee, adiga xaaladda aan la daboolin ayaad qaadatay, dadkii way aqoonsadeen, waxayna xagooda ka noqotay, wax aan lagu khiyaameen Karin, Iyagguna markii ay xaaladaasi dareemeen, waxay ku dabooleen warqad u eg tan lagu daboolo nanaca iyo shukulaatada, si ay dadka ugu qariyaan xaqiiqdeeda, ayna ku khiyaamaan,

Adiga isha biyaha ayaad gacanta u hoorsatay, oo aad biyaha ka cabtay, iyaguna koob bay biyuhu ku cabeen, kaaso miir daboolay maankooda.

INANKEYGIYOO

Iyo dareeraha ku jira koobka Abii Nawaas[1] taaso uu gaaray go`aamadeeda kisra [2], waa sida biyo mareynada oo kale.

Iyo shahwada ka muuqato fariinta aad iisoo diratay, waa sida shahwada ka muuqata gabayga iyo haasaawaha abwaanada, iyo farshaxanka farshaxamiistaha, iyo laxanka heesaha, hasa yeeshee-

magac –uyaalka fariintaada waa mid muuqdo, iyaguna magac-uyaalka ay adeegsadeen, waa mid qarsoon, cudurna waxaa u xun, midka qarsoon!

Mana jiro ruux soo gaaray da`da aad maanta ku jirto, ilaa uu laabtiisa ka shidmo walax dansanaa, uu kuleelkiisa ka dareemay jirka,

Aragtidii uu aduunyada u lahaa way isbadaleysaa, aduunyada waxay la noqoneysaa aduunyo kale, dadkuna waxay la noqon dad kale, taasi wixii ka danbeeyana ma arkaayo xaqiiqada, mana u arki doono haweynka inay yihiin bani aadan, oo nafleey ah , oo leh fadliga aadanaha kale ay leeyihiin, mana ka arki doono cillado, sida aadanaha oo kale, hasa yeeshee baahida aw u qabo ayaa waxay kulminaysaa rajooyinkiisa oo idil , waa rabitaan ay ku kulmaan yoolalkiisa oo idil.

---

(1) Abu nawaas wuxuu ahaa abwaan, waxaana lagu tiriyaa abwaanada khamriga cabi jiray, waxaa la sheegay, in sanadihii ugu danbeey ee noloshiisa uu ka toobad keenay.

(2) Kisra Waa Boqorkii furus (bershiya).

INANKEYGIYOO

Markii uu xaaladaasi dareemo, wuxuu haweeneyda u xeraayaa maro oo ka sameysaan male-awaalkiisa iyo dareenkiisa,

Maro uu ku dadaayo cilladaha ay qabto, uguna ceeb qarinaayo ceebaheeda iyo nusqaankeeda, wuxuu naftiisa kaa dhaadhicinaaya inay tasaale u tahay khayrka oo idil, iyo quruxda oo dhamaystiran,

Wuxuu haweeneyda ka yeelaayaa sida uu sameeyo gaalka mushrigga ah, dhagax ayuu gacantiisa ku samaynaayaa, ka dib wuu caabudaaya isagoo u adeecsan ilaah ahaan!

Sanamku wuxuu gaalka mushrigga u yahay ilaah , haweeneyduna waxay jacaylowga u tahay sanam male` ah!

Inta aan kor ku xusay waa arin dabiici, oo macquul ah, hasa yeeshee waxaa dabiici iyo macquul midna ehaynin, wiil shan ii toban jir ah inuu intaasi dareemo, ka dib ay qasab ku noqoto inuusan ka bixin xindaabka habka waxbaridda, aw ku sii nagaado iskuulka ila uu ka gaaro labaatan ama shan ii laabaatan sano.

Wiilka intaasi sanno muxuu sameynaayaa, waana sanadaha ugu daran ee cimriga aadanaha, oo ay shahwadiisu daran tahay, uuna dareemo cilad nafsiyeed iyo jireedba, sido kale wuxuu dareemaaya shahwo iyo karkar, muxuu samaynaayaa? Tani ayaa ah dhibaato.

Sadax midkooda dooro!

Sunada Eebbe iyo dabcigga aadanaha waxay leeyihiin: guurso misana xaaladda bulshada ka jirta iyo habka waxbaridda ,waxay leeyihiin:

Sadax xal midkooda dooro, dhamaantoodana waa shar, waxaadna iska ilaalisaa inaad ku fakirtid xalka afaraad, .. taaso kaligeed kheyrka ah, waana guurka....

- xalka 1aad : inaad kali la noqotid naftaada iyo dhalanteedka-dareenkaaga, iyo riyada damacaaga, aad ku quustid sidaad ugu fakiraysid, kuna nafaqeysid riwaayadaha iyo filimaanta fisqiga , iyo sawiraanta qaaqawan , ilaa aad naftaada ka buuxisid , oo ay saamayso aragaaga iyo maqalkaaga, ka dib dhinacaad eegtaba aadan ka arag waxaan ehayn sawiraantii haweynkii qaaqaawana, waxaad ku arkaysaa buugga juquraafiga marka aad kala furto, waxay kaga soo muuqanaayaan soo bixida dayaxa 14-aad marka aad isha saarto, waxay kuu soo muuqanaayaan aruurti iyo seq dhexe, waxaad kaloo ku arkaysaa riyo soo jeedka, iyo midda hurdadaba.

INANKEYGIYOO

Qayskii Leyla jeclaa, wuxuu yiri:

Waxaan doonaaya inaan ilaawo xasuusteeda, markaan is ilaawsiyo ayay waddo kasta igaga soo muuqaneysaa!

- Xalka 2aad: waa inaad isku xalisid gacantaada (siigo) horay magac kale ayaa loo yaqiini, dhab ahaantiina culumada way ka warameen xukunkiisa, abwaanada gabayo ayay ka qoreen, sido kale bugaag ayaa laga qoray , mana jecli inaan bugaagta cid u tilmaamo, xalkaan ayaan ugu shar yar marka labada kale lala barbar dhigo , uguna khatarta yar [1], hasa-yeeshee xadka hadii la dhaafiyo oo aad loo istamcaalo, nafta ayuu welwel ku beeraayaa, jirkana wuu bukanaayaa, wuxuu wiilka dhalanyarada ah ka dhigaaya sida oday daalaan, oo murugaysan, oo cidlo doon ah, oo dadkii ka cararaayo, oo ka baqa la kulunkooda, wuxuuna ka dhigaaya mid ka baqaaya nolosha iyo waajibaatkeeda,

xalkaani waa xukun dil, oo isugu xukmay isagoo nool.

---

[1] cidna kuma boorinaayi , balse, waa xaqiiqo ay isku raaceen qaar ka mid ah dhaqaatirta.

INANKEYGIYOO

- Xalka 3aad: inaad ka soo gurato geedkii Eebbe naga xarimay, oo aad qaado waddadii marin hababka, oo aad booqoto guryaha macsiyadda iyo sinadda,

Oo macaansi yar aad ku waydo badqabkaaga, itaalkaaga, mustaqbalkaaga iyo diintaada, sido kale waxaad wayneysaa shahaadada, taaso aad ku dadaaleysay inaad hesho, iyo shaqada aad ku haminesay inaad ka shaqayso, iyo aqoontii aad rajayneesay inaad barato, intaasi ka dib awood iyo itaal kuu ma harin aad ku xamaalato.

Hana moodin inaad ka dhargeysid, maya, ee adiga kullamaa aad xiriir mid la sameyso, xiriirkaasi qaldan wuxuu kugu sii kordhinaaya haraadka, waxaadna la mid tahay qof biyo dhanaan cabay, kullamaa aad cabto biyaha dhanaanka ah kullamaa uu haraadka kugu saa`ido.

Xitaa hadii aad garanaysid kumanaan gabdho ah, ka dib aad aragto mid adiga ku rabin, oo xagaaga ka jeedsato, markaasi iyada kaliya ayaa kuu muuqaneyso, waxaadna dareemeysaa xanuun,maadaama aad wayday, waa xanuun la mid xanuunka uu dareemo wiil aan waligiisa gabar la kulmin.!

INANKEYGIYOO

Kaba soo qaad waad ka heshay wax walbo aad ka dalbato, awood ku hel

Ama maal ku hel, su`aashu waxay tahay: jirkaaga ma u adkaysan karaa daboolidda shahwada?

Cafimaadkaaga ma xamili karaa rabitaanka shahwadda?

Arinkaan Waxaa ku tiir beelay ragga xoogga badnaa, imisa rag oo ka mid ahaa, kuwa lala yaabo xoogooda, oo horyaal u ahaa qadista miisaanka culus (gym-ka) iyo lagdanka, iyo tartamada orodka ku dheereyn jiray, marka ay isku dhiibayn damaca shahwada , ayna u hoggaansameen dareenkooda, way tiir dhigeen.....

Rususha shaydaanka

Cajaa`ibta xikmadda Eebbe waxaa ka mid ah inuu ka yeelay dhawrsananta abaalkeedu badqab iyo fifircooni, macsiyaddana wuxuu ciqaabteedu[1] ka yeelay dullinimo iyo cudur, laga yaabo inaad aragto nin aan da`diisu dhafin 30-ka hasayeeshe la moodaayo 60 jir, sido kale waxaad arkaysaa 60 jir oo aad moodeysid 30jir , oraah ayaa jirta oo dhaheyso: qofki dhawra dhalyarnimadiisa, waxaa loo dhawraa duqnimadiisa.

Ninka raga hadii loo ilaalin lahaa dareemihiisa, oo aysan jirin wax damac galiya, sida: sawiraanta, riwaayadaha iyo filimaanta, oo aysan jiri lahayn dumar isqaawiya, dareenkiisa muusan kici lahayn bishii oo dhan hal ila laba jeer mooye, ama labadii bil hal jeer.

---

(1) Eebbe cidii uu doono ayuu diraaya nadiir (nadiirku waa wax lagu cabsi galiyo dadka), si ay ugu waano qaataan, taasi waxaa ka mid ah cudurada halista ah, taaso ay ku daaleen dhaqaatirtu daaweentiisu, oo ay ku adkaatay in ay usoo saaraan daawo, cudurkaas oo ka imaanaayo sinada iyo fuxshiga kaliya, waana cudurka (aydiska)

Hadii oo Eebbe ku hanuuniyo helitaanka daawadiisa , Eebbe wuxuu usoo diraaya cudur kale, ka dib waxaa xigga maalin aysan dadku Karaynin in ay iska celiyaan waxaa ku yimaada misna aan heli karaynin wax ay iskaga difaacan, waana maalinta qiyaamaha, maalinta naarta jahanama la soo bandhigo oo ay liqayso gaal kasto danbaabay, Eebbe ayaan ka magan galay malinkaas.

INANKEYGIYOO

Maxaa yelay xeerarka sugan ee cilimiga waxaa ka mid ah, kullamaa uu xaywaanka yagleello, misna kubco, (xaywaankuna waa insaanka) waxaa xagiisa ka yaraado galmada, waxaana dheeraanayo muddada uurka, tusaale diiqa iyo doorada , maalinkasta way is boodaan, muddada ay doorada ukunta uurka ku siddo waa hal ama labo malin kaliya, halka ay bisadda ka mid tahay naasleyda , wuxuu labka u tagaaya dhedigga, sanadkii hal jeer ama laba jeer, bisadu sanadkii hal ilaa laba jeer ayay rimintaa

Waxaanna filaaya inuu bani aadanka ka sareeyo kana fadli badan yahay bisadda, marka sabab ayay bisaddu u yeelatay, xili u gaar , waliba waa bisha febraayo, oo la yiraahdo waa bisha ay basaduhu isu tagaan, oo maxaa sababay oo ay ugu noqotay dadka qaar bilaha dhan febraayo?

Dhiibatada oo dhan waxaa sababay wax-yaabaha dareenka kiciya

Kuwa sharta u tilmaamo dadka, iyo (Rususha shaydaanka), kuwaaso haweynka u qurxiya qaawnidda, iyo isqurxinta, iyo is dhexgalka, taaso ay ku magacaawaan reer magaalnimo, hormar, ilbaxnimo, iyo waxa ay yiraahdaan: (feminism) xuriyyada haweynka, sinaanta raga iyo dumar, i.w.m.

Daryeelkaas ay haweynka u muujinaayaan, wuxuu la mid yahay daryeelka hiliblaha, uu laxda u muujiyo, coos ayuu siinaaya , wuu ilaalinaayaa, wuu korinaayaa , hasa yeeshe waxaa u danbeeyo gawracid ....

INANKEYGIYOO

Qaarne waxay isku xilqaameen in bogga 1aad ee joornaladooda inay ku faafiyaan sawirada atariishooyinka ajaanibta oo qaaqaawan, ka dibna gabdhaha iskuulada dhigata, ayagoo ku ganbanaayo magaca isboortiska, iyo dumarka u dalxiis taga xeebaha, ayagoo ku ganbanaayo magaca dalxiis, taasine waa hawl ay muddo dheer ay soo wadeen, iyo qorsho cayiman, qorshahaas iyo hawsha ay ku hawlanaayeen uguma sabrin Eebbe dartiisa! ee waxay ugu sabreen inay shaydaanku ku raali galiyaan, Xumaan lama arag , haddaysan jiri lahayn kuwaan aan soo sheegnay iyo joornaaladooda, iyo riwaayadaha horay , iyo filimaanta hada jiraan, iyo haddaysan jiri lahayn kuwa ka soo qalin jabiyay iskuulada marin habaabinta, ka dibna loo xil saaray arimaha iskuuladda ay dhigtaan wiilasheena iyo gabdhaheena.

Horay uma anan arag, maankeyguna kuma soo dhicin, maalin inaan arki doono gabdhaha muslimiinta oo lugahooda qaawan, misana qaawin doono qayb ka mid jirkoodii, si ay u cayaaraan basket-ka (basketball), ama xaflad awgeeda, mise dalxiis xeebaha lagu dalxiiso, Qaasim Amiin[1] iyo kuwa ku fikirka ah, hadii dib loo soo noleeyo, oo ay arkaan xaalka haweynka sida uu noqday, naxdin bay la suuxaayaan!

---

(1) Qaasim Amiin waa qoraa u dhashay dalka masar, waana ninkii ugu horeeyay ee dalalka carabta ee u dooday xuriyada haweynka.

INANKEYGIYOO

Waxaan kuu xaqiijinaaya inuu arinkaan uusan ehaynin sida aad mooddo, dhab ahaanti waa wax yar oo fudud, inagga ayaa qiimo u yeelnay markaan ka hadalnay oo aan ku tilmaamnay inu naftu saameyn weyn ku yeesho.

Sido kale, Waxaa qiimo u yeelay waxa lagu magacaabo fanka:

Sida gabayga, sheekoyinka, filimaanta, iyo heesaha, kuwaan ayaa lagu qurxiyaa haweynka, laguna qurxiyaa jaceylka,

haddaysan jiri lahaeyn, adigu ma arki lahaynin, xiriir jireedka dhex mara raga iyo dumarka, kumana weynaan lahayn naftaada iyo nafta qeyrkaagaba waxa aad maanta daraymeysid, waa sida qaliimadda ay dhaqaatiirtu sameeyaan, dhab ahaanti way xanuun badan tahay,

sida awgeed dhaqtarku intuusan qaliinka sameynin wuxuu bukaanka duraaya cerbad (kabaabiso), taaso ka indha tareyso xanuunka iyo foolxumada ay leedahay in la qalo jir bani aadan, marka shahwaduna waa kabaabiso kaa indha tireyso xumaanta.

INANKEYGIYOO

Hadii uu Aadanahu si dagan ugu ka fakari lahaa, hadii uu caqligiisa ku fakari lahaa uusan kaliya ku fakarin dareenkiisa, wuxuu u arki lahaa sida aan aniga ugu waramay.

Wax yaabaha dadku damac galiya maysan xoogsadeen, haduusan jirin saxiibka xun, kaaso kuu tilmaamo wadadda fuxshiga, waliba wuxuu ku gaynaaya ila elbaabkeeda, shahwada waa sida gaari shidaal ka buuxa, saaxibka xun waa furaha gaarigaas lagu kaxayn lahaa, gaarina ma dhaqaaqo asigoon la kicin.

Bani aadanku Naftiisa Cid Kale Kama Hormariyo!

Waxay ila tahay inaan maqlaayo adigoo dhahaayo cudurku waakan, waana midka aad ii tilmaamtay, ee aaway daawada?

Daawadu waxay ku jirtaa, inaan ulaabano sunada Eebbe, iyo walax kasto aan u celino dabeecaddaha uu Eebbe ku abuuray, hadduu ilaahay wax naga xarimmo waxbuu badalkeeda inuu xalaaleeyay.

Eebbe ribada ayuu naga xarimay, wuxuu badalkeda inuu xalaaleeyay ganacsiga, wuxuu naga xarimay sinada wuxuu inuu xalaaleeyay guurka, Marka daawadu waa guurka.

Guurka ayaa kaligii ah wadada khayrka, iyo dib uhabaynta bulshada, marka waxaan ururada islaamiga iyo hay`adaha sama-falka, usoo jeedinaayaa, in ay hawlahooda sama-falka ku soo daraan, wacyi galin oo dhalanyarada lagu dhiirinaayo guurka, oo waliba ay u fududeeyaan, oo ay u tilmaamaan wiilka guur-doonkaah, gabar guurka diyaar u ah, mid ay isu wanaagsan yihiin, hadii ay jirto dhaqaalo yari, inay u deemiyaan wax uu ku aqal gali karo, taladaan aan soo jeediyay faafaahin dheeri ayay u bahan tahay cidii dooneyso inay dhaqan galiso way ila soo xariiri kartaa.

INANKEYGIYOO

Hadii uu guurka kugu adkaado, sinaduna ay xaaraan tahay sidaan ognahay, waxaa ku furan,(sublimation) waa in awooddada iyo waqtigaaga u jihaysid dhanka wanaagsan,

Mana doonaayo qaybtaan aan kuu soo qoro, anigoo adeegsanaayo dhamaanteedaa erayo bixino laga istacmaalo cilmi nafsiga, sidaa awgeed waxaan diirada saaraayaa tusaalooyin si aad igu fahanto:

Kirliga shaaha oo dabka ku karkaraayo, hadii aad daboosho meesha uu qiiqa ka saari lahaa, cadaadiskaasi wuxuu sababaaya inuu kirliga qarxo, hadii aad daboolka ka qaado biyaha wuu daadinaaya wuxuuna dhinacyada ka gubaaya kirliga,

Hasa yeeshee isla kirligaasi biyaha karkaraayo ku jira , hadii aad ku xariiriso tubooyin qaada qiiqa, uu sababay kuleelka, wuxuu isku badalaaya qalab uu hawla badan lagu qabsan karo.

Tusaalaha 1aad: waa qofka si joogta ah shahwada ku fakaro, uuna naftiisa caburiyay,

Tusaalaha 2aad: waa qofka dareenkiisa raac raaco, oo xaaraanta la aado,

Tusaalaha 3aad: waa qofka tamartiisa iyo waqtigiisa u jiheeyo dhanka wanaagsan.

INANKEYGIYOO

Tamartaada iyo waqtigaaga inaad u jiheeyso dhanka khayrka, oo aad kaga nafistaa shahwada, oo aadan juhdi ku bixin ku fikirkeeda, juhdiga iyo tamarta kuu keydsan aad la aado xagga Eebbe, oo aad ku bixidaa cibaadada misne shaqadaada inaad u go`daa, ama inaad isku mashquuliso baaritaan, ama inaad sameysato hobi sida fanka farshaxanka, mise aad curiso gabay kaaso aad ku muujinaysid dareenkaaga, ama aad u jeesato dhanka jir-dhiska, oo tamarta ku bixido almiintada iyo gym-ka, ama aad ka qayb gasho tartanada dhalyarada loo qabto.

Inaankeygiyoo Bani aadanku Naftiisa Cid Kale Kama Hormariyo!,

Wiilka dhalanyaradda ah hadii uu muraayad hor istaago uu arko murqaha garbahiisa, iyo xabadkiisa, iyo gacmahiisa, jirka oo sidaasi u dhisan ayuu ka jecelyahay kan dumarka, isagu diyaar uma noqon doono inuu si fudud ku waayo murqahaas, misne gabar darteeda inuu isku liso, ka dib uu soo laabto isago laf iyo maqaar ah! Si walbo ay u quruxsan tahay, jirkiisa uma baabinaayo.

INANKEYGIYOO

Daawadu waa sida aan horay kugu sheegay : waa guurka, waana cilaaj dhamaystiran , hadii aad kari waydo guurka, waxaa kuu furan inaad fikirkaaga aad meelaha kale aad u jeediso, waa sax cilaaj dhamaystiran ma ahan balse waa dajiye oo ku meel gaar ah, waa dajiye fiican aan dhibaato ka imaaneynin.

Hasa ahaata, doqomada iyo kuwa dadka marin habaabiya waxay yiraahdaan: daawadu waxay ku jirtaa labada jinsi in ay isdhaxgalaan!

Si ay u yaraato shahwada, waxayna ku yaraaneysa la qabsiga, iyo in dhalanyarada loo furo goobo ugaar arimahaas oo sharciyeesan , lana baabi`iyo goobaha sharci darada.

INANKEYGIYOO

Inankeygiyo intaba waa been iyo naxli, isdhaxgalka waxaa tijaabiyay umadaha kufriga[1] waxaan fisqi iyo fasahaad ehayn maysan ka dhaxlin.

Kaba soo qaad, goobo ugaar ah ayaa loo furay dhalanyarada, waxaa korkeena ahaanaayo inaan ka dhigno meel weyn oo deeqda dhalanyarada oo idil, Goobtaasi hadii Qaahira (casimada masar) laga furo, toban kun iyo ka badanba dhalanyaradu waxay noqonaayan kuwa dhileysta, maxaa yelay Qaahira waxaa ku nool labo milyan iyo bar[2] qiyaas ahaan tirada dhalanyaradana waxay gaareysaa labo boqol kun,

Hadii aan midaas wiilasha u banaynno , waxay ka maarmi doonaan guurka, Marka su`aashu xigta waxay tahay gabdhaha maxaan ku sameyneeynaa?

Iyagana miyaan u furnaa goobo ay ka raadsadaan dhiley?

---

(1) Umadaha kufriga, waa dawladaha loo yaqaan iskandineefiya, waxay u ogalaadeen wiilasha iyo gabdhaha in ay dhaxgalaan, oo ay sameeyaan waxay doonaan, su`aasha waxay miyay ku farxeen midaas? Jawaabtu waa may, waxaana cadeenteeda ah, wadamadaas ayaa ugu badan isdilidda , iyo cudurada nafsiga, iyo istacmaalka daroogada, iyo waxay sameynaayan wax walbo ay ugu badbaadi karaan halgan nolosha. (2) Qaahira haatan waxaa ku nool in ka badan 10 milyan.

Astaanta awoodda

Inankeygiyoo walahaai waxay ay sheegayaan oo dhan waa been iyo naxli, iyo wax walbo oo ka soo maaxda, kama imaan maankooda, ee wuxuu ka yimid dareenkooda, iyagu ma doonaayaan toosinta akhlaaqda, iyo hormarinta haweynka, sido kale kama ahan faafinta ilbaxnimada, iyo reer magaalnimo, iyo nolasha jamacadeed, waa uun erayo ay carabkooda soo mariyaan, malin kastana waxay la yimaadaan wax ay ku dadaan xumaanta ka dibna ay dadka ka iibiyaan.

Waxay doonaayaan gabdhaha aan dhalnay iyo kuwa nala dhashtay in ay dibada usoo saaran, ka dibna ay ku macaansadaan eegmada waxa jirkooda muuqda iyo waxa qarsoonba, oo ay ka helaan raaxo xalaal iyo xaaraanba

Ka dibna wadada ay kaligooda la maraan, iyo in xafladaha ku wada cayaaraan, walidiinta qaar ka mid ah ayaa ilbaxnimadaasi ku sirmay,

Waxay hurayaan sharafta gabdhahooda, si loo dhoho kuwaani waa reer magaal.

INANKEYGIYOO

Ka dib, Inankeygiyoo: haka labalabayn inaad qoraal isoo qorto, hadii aad ku qanci waydo jawaabtaan, hana ka xishoon waxa aad kala kulantay kuleelka shahwada, taasi Eebbe ayaa kugu dhaliyay, waana astaanta Awooda iyo dhalanyarnimada, waxaan kugu la talinaaya guurka,

xitaa hadii aad arday tahay, hadaad awoodi waydo guur, waxaad isku dhawrtaa cabsida Alle, iyo cibaadada, oo aad isku mashquuliso waxbarashada, sido kale waxaan kugula talinaayaa almiintada iyo jirdhiska, waa cilaaj aad u wanaagsan.

Ka hadalka arintaan waa mid aad u dheer , Aniguna dhanbaalka intaan ayaan ku soo koobay, qofkii doonaayo inaan talo kale siyo waan siinaaya, ha noqoto fariin ama dhanbaal kale.

Ka socoto: Ustaad. Abdiaziz Ali Sheikh

Ku socoto: dhamaan dhalanyarada soomaliyeed.